# Casharka 1

-Maxaan halkan u imid?
-Inaan ku xumeeyo miyaan halkan u imid?
-Maya.

-Ma waxaan u imid halkan inaan reerkaaga iyo Saaxiibbadaaba xumeeyo?
-Maya.

-Ma waxaan halkan u imid inaan dhulkaaga iyo xoolahaaga boobo Maya.

-Maxaan halkan u imid?
-Waxaan halkan u imid hal asbaab.

-Waxaan halkan u imid inaan kuu sheego farriinta ugu ahmiyadda weyn leh dunida.

-Waxaan halkan u imid inaan kuu sheego farriinta Ilaah.

-Uma aanan imanin halkan inaan kuu sheego farriin nin Cad ka timid.
-Uma aanan iman halkan inaan kuu sheego weliba farriin nin madow ka timid.

-Waxaan halkan u imid inaan kuu sheego farriinta Ilaah oo keliya.

-Haddii Ugaaska ama duubka ama Wabarka ama suldaanka beeshiinna isugu kiin yeero inaad maqashaan farriimo muhiim ah, miyaad iman lahayd adigu?



-Haa waad iman lahayd.

-Maxaad u imanaysaa shirka duqa reerku isugu yeeray beesha oo aad uga qayb gelaysaa?

-Waxaad u imanayso shirka oo aad uga qayb gelayso waxaa weeye farriin wax-ku-ool ah ayuu Ugaasku kuu hayaa.
Fariinta ugaaska waa muhiim laakiin wax ka muhiimsan ayaa jira

-Miyey jirtaa haddaba farriin ka muhiimsan tan ugaaska?
-Farriinta Ilaah ayaa ka muhiimsan tan ugaaska

-Maxaa haddaba keenay in farriinta Ilaah ay noqoto tan ugu muhiimsan dunida?
-Fariinta Ilaah waa maxay sababta kadhigtay tan ugu muhiimsan dunida.

-Maxaa  ugu wacan in Ilaah oo keliya uu yahay kan aan weligii Been sheegin?
-Ilaah oo keliya ayaa runta sheega.

-Waa kuma qofka aadmiga ah ee aan weligii been sheegin?
-Dadka oo dhamiba been bay sheegeen.

-Yaa idinka mid ah beesheenna ee aan weligii been sheegi?
-Idina oo dhaniba been waad sheegtaan.

-Aniga qudhayda ayaa been sheegay haatan ka hor.
-Nin waliba ee caddaan ah been buu sheegaa.
-Nin wlaiba ee madow ahna been buu sheegaa.

-Dadka oo dhaniba been bay sheegaan.

-Waa kuma Kan keliya ee aan marnaba been sheegin?
-Waa Ilaah.

-Maaddaama aanu Ilaah been-sheegin, Ilaah waa Kan keliya ee runta inoo sheega.
-Madaama aanu Ilaah marnaba been sheegin, Ilaah waa kan keliya ee runta noo shego
-Maaddaama aanu Ilaah marnaba been sheegin, Ilaah waa Kan keliya ee inoo sheegi kara runta isaga ku saabsan.

-Maaddaama Ilaah aanu marnaba been sheegin, ayaa farriintiisu tahay tan ugu ahmiyadda weyn leh dunida.

-Ragga, waxaa shaqada ay ku hawlan yihiin uga muhiimsan farriimaha Ilaah.

-Maxaa taas sabab u ah?
-Waxaa taas sabab u ah in Farriinta Ilaah oo keliya ay dadka ka badbaadin karto dhimashada.

-Hablahana, cunto kariska waxaa kaga muhiimsan farriimaha Ilaah.

-Maxaa taas sabab u ah iyana?

-Waayo farriimaha Ilaah oo keliya ayaa hablaha ama haweenka ka badbaadin kara dhimashada.

-Carruurtana, farriimaha Ilaah ayaa kaga muhiimsan ciyaarta.

-Maxaa taas sabab u ah?
-Waxaa sabab u ah in farriinta Ilaah oo qura ay carruurta ka



badbaadin karto dhimashada.

-Aaway farriintii Ilaah?
-Farriinta Ilaah waxay ku qoran tahay Kitaabka Ilaah.

-Kani waa kitaabka Ilaah.
-Sidee baa farriinta Ilaah ku soo gaartay kitaabka Ilaah?

-Ilaah wuxuu awooday inuu qoro Kitaabkiisa, laakiin Ilaah sidaas ma yeelin.

-Wakhti hore, Ilaah wuxuu doortay dadka qaar, wuxuuna hadalladiisii geliyey maankooda.

-Dabadeedna, raggaas waxay Hadalladii Ilaah ku qoreen Kitaabka Ilaah.

-Miyaa haddaba raggaas hadalladooda ku qoreen kitaabka Ilaah?
-Maya.

-Raggaas Ilaah doortay hadalladooda ma ayan qorin.
-Raggaas Ilaah doortay waxay keliya oo qoreen Hadallada Ilaah.
-Raggaas Ilaah doortay waxay Hadalladii Ilaah u qoreen sidii Ilaah u sheegay iyaga.

-Ilaah wuxuu doortay rag gaaraya ilaa iyo afartan nin si ay Hadalladiisa ugu qoraan kitaabkiisa.

-Miyaa raggaasi ay isku wakhti noolaayeen, oo ay wada qoreen Hadallada.
-Maya.

-Raggaas Ilaah u doortay inay Hadalladiisa qoraan isku wakhti ma wada nooleyn.

-Meeqa sannadood ayey haddaba qaadatay in la qoro Hadallada Ilaah oo dhan?

-Waxay qaadatay 1'600 oo sannadood in kuwii Ilaah doortay ay ku qoraan Haddalkiisa.

-Haddaba yey ahaayeen raggii Ilaah u doortay inay Hadalkiisa qoraan?

-Raggii Ilaah u doortay inay Hadalkiisa qoraan waxay ahaayeen niman Yuhuud ah, iyo hal nin oo Giriig ah.

-Luuqaddee bay ku qoreen raggaasu Hadallada Ilaah?

-Waxay ku kala qoreen luuqadda Cibraaniga iyo luuqadda Giriigta.

-Miyaa raggaasu ku qoreen Hadallada Ilaah luuqadda Ingiriisiga?
-Maya.

-Miyaa raggaasu Hadalladii Ilaah ku qoreen luuqadda Spaanishka?
-Maya.

-Miyey raggaasi ku qoreen Hadallada Ilaah luuqadda Faransiiska?
-Maya.

-Waxay raggaasu ku qoreen Hadallada Ilaah luuqadahooda.

-Haddaba ragga Ilaah u doortay inay qoraan Hadalladiisa waxay ahaayeen niman Yuhuud ah iyo hal nin oo Giriig ah.



-Raggaasu waxay Hadallada Ilaah ku qoreen luuqadda Yuhuudda iyo tan Giriigta.

-Dabadeedna, dad kale ayaa soo galay dalka Yuhuudda, waxaanay akhriyeen Hadalladii Ilaah, waxaanay bilaabeen inay luuqadahooda ku qoraan Hadalladii Ilaah.

-Hadallada Ilaah waxaa loo turjumay luuqado badan oo dunida looga hadlo.
-Hadallada Ilaah waxaa lagu qoray imminka luuqaddaada.

-Haddaba imisa ayaa Hadallada Ilaah ee ku qoran Kitaabka Ilaah run ka ah?
-Iyaga oo dhan waa run..

-Maxaase Hadallada Ilaah oo dhan loogu qoray Kitaabka Ilaah oo qura?
-Waxaa ugu wacan in Ilaah aanu been sheegin.
-Waxaa kaloo ugu wacan in Ilaah runta oo keliya uu sheego.

-Maxaynu u rumaysanaynaa Hadallada Ilaah ee ku qoran Kitaabka Ilaah?

-Waxaannu u rumaysanaynaa in Ilaah aanu been sheegin.
-Waxaan kaloo u rumaysanaynaa in Ilaah runta keliya uu sheego.

-Waa kuma Kan keliya ee runta sheega?
-Ilaah.
-Waxaan akhriyey Hadallada Ilaah ee ku qoran kitaabka Ilaah, oo waxaan garanayaa in Hadallada Ilaah oo dhaniba ay run yihiin.

-Haddii aad maqasho Hadallada Ilaah, waxaad kaloo garanaysaa in

Hadallada Ilaah oo dhan ay run yihiin.

-Waxaa taas ugu wacan in Ilaah aanu marnaba been sheegin.
-Waxaa kaloo ugu wacan in Ilaah runta oo qura uu sheego.

-Ilaah warar kale oo badan ayuu inoo hayaa.
-Marka ay sidaas tahay, maalmo  bay qaadanaysaa in wax lagaa baro Hadallada Ilaah.

-Kanu waa tafaasiil kale.
-Meeqa  maalmood ayey kuugu qaadanaysaa inaad barato sida beeraha loo falo.

-Maalmo badan.
-Maxay maalmo badan u qaadanaysaa in la barto sida wax loo beerto?

-Waayo waxa jira xaqiiqooyin fara badan oo khuseeya beerashada.

-Waa inaad wax ka baratTaa sida ciidda loo diyaariyo.
-Waa inaad weliba wax ka baratTaa sida miraha loo beero.
-Waa inaad wax ka baratTaa sida wax loo abuuro iyo sida beerta loo limo.

-Waa inaad baratTaa sida miraha loo goosto.
-Isla sida ay wakhti u qaadanayso beerashada, ayey wakhti dheer u qaadanaysaa in la barto Hadallada Ilaah.

-Waxaa taas ugu wacan in xaqiiqooyin fara badan ay ka buuxaan Hadallada Ilaah.
-Haddii aad dhegaysataan Hadallada Ilaah wakhti fara badan, waxaad ka baranaysaan xaqiiqooyin fara badan oo Ilaah ku



saabsan.

-Bal aan sharraxaad kale idin siiyo:

-Miyaad cuntaa cunno Maalin waliba?
-Haa.
-Maxaad cunnooyinka u cuntaa maalin waliba?
-Waayo jidhkaaga wuxuu u baahan yahay cunno maalin waliba.

-Isla sida jidhkaagu cunno ugu baahan yahay maalin waliba ayaad adiguna ugu baahan tahay inaad dhegaysato Hadallada Ilaah maalin waliba.

-Haddii maalin waliba aadan cunno cunin,  maxaa kuugu dhacaya?
-Waad dhimanaysaa.

-Haddii aadan maalin waliba dhegaysan Hadallada Ilaah, waad dhimanaysaa.
-Maxaa keenay in dadka qaarkood aanay garanaynin farriimaha Ilaah?

-Waxaa ugu wacan in dadkaasu diideen inay maqlaan farriimaha Ilaah.
-Waxaa kaloo ugu wacan in dadkaasu diideen inay rumaystaan farriimaha Ilaah.

-Haddii aad maqasho Hadallada Ilaah maalin waliba, waad faraxsanaa-naysaa.
-Haddii aadan maqlin ama dhegaysanin Hadallada Ilaah maalinta waliba, waad murugoonaysaa.
-Waxaan rajaynayaa inaad u iman doonto inaad maqasho Hadallada Ilaah maalin waliba.